


# TUSMADA


**WAA KUMA XHG?**
- Awoodaha, Aragtida, Himilada & Qayimkayaga ......... 1

**GOGOL-DHIG**
- Fariinta Hantidhawraha Guud .................................... 2

**DULMARKA SANNADKA 2025**
- Muuqaalka Guud ee Waxqabadka ................................ 3

**ISBEDDELKA ISTARAATIIJIGA AH**
- Naqshadda Casriyeynta & Qaab-dhismeedka ............ 4

**DULMARKA FULINTA BAARISAHA:**
- Xisaabaadka Guud ee Dowladda .................................. 5
- Warbixinta U-hoggaansanaanta Sharciga .............. 6 - 7
- Baarista Dawladaha Hoose ............................................ 8
- Baaritaannada Gaarka ah/Degdegga ah ...................... 9

**ISBEDDELKA ISTARAATIIJIYADEED EE XAGGA (VFM)**
- U-Jeedinta Diiradda Dhanka 'Waxtarka Maaliyadda' ....................10
- Dhisidda Qaab-dhismeedka Baarista Waxqabadka ........... 11

**HANTIDA UGU QAALISAN EE AAN LEENAHAY (DADKA)**
- Maalgashiga Tayada: Dhismaha Shaqaalaha ............. 12
- La-tashiga Daneeyeyaasha & Dadweynaha .............. 13
- Mas'uuliyadayada Bulsho & Waddaniyadeed ........... 14

**TUBTA HORUMARKA /HIIGSIGA**
- Hiigsiga 2026: Caqabadaha & Mudnaanaha ............ 15




# WAA KUMA XHG?

Anagoo ah Hay'adda ugu Sarraysa ee Baariseed (SAI) ee Puntland, waxaan nahay ilaaliyaha koowaad ee hantida ummadda. Waxaan hadda ka guureynaa hannaankii hore ee kaliya diiradda saari jiray maaliyadda iyo u-hoggaansanaanta sharciga, anagoo u guurnay nidaam cusub oo ku qotoma 'Natiijo iyo Waxqabad' (Performance-driven approach). Hannaankan cusub wuxuu dammaanad qaadayaa in shillin kasta oo dawladdu isticmaasho uu ka dhasho adeeg ay shacabku taaban karaan. Waxaan awood siinaynaa Xukuumadda, Baarlamaanka, iyo Shacabka annagoo siinayna xogo dhab ah oo madax-bannaan, si loo hirgeliyo isla-xisaabtan iyo daahfurnaan.

## Aragtidayada

Inaan noqono Hay'ad Hantidhawr oo Sare, madax-bannaan, laguna kalsoon yahay, taas oo abuurta kalsoonida dadweynaha, kana qeyb-qaadata barwaaqada shacabka Puntland.

## Himiladayada

Inaan dhiirrigelino isla-xisaabtanka, daahfurnaanta, iyo maamul-wanaagga annagoo adeegsanayna baariso tayo sare leh, oo madax-bannaan. Baarisahaas oo Xukuumadda, Baarlamaanka iyo Shacabkaba siin doona aragtiyo miisaan leh oo wax-ku-ool ah (Value-added insights)

## AWOODAHA IYO WAAJIBAADKA XAFIISKA

Waxaa sees u ah Qodobada 109 & 110 ee Dastuurka Puntland.

### Madax-bannaanida iyo Is-maamulka

Xafiisku waa hay'ad dastuuri ah oo lagu dhisay Qodobada 109 & 110. Xafiiska Hantidhawraha Guud wuxuu si buuxda oo xor ah uga hawlgalaa dhammaan deegaanada Puntland, si uu u xaqiijiyo kormeer maaliyadeed oo eex la'aan ah (Impartial oversight).

### Kormeerka iyo Baaritaanka Guud

Xafiisku wuxuu waajib u leeyahay inuu la socdo dhammaan kharashaadka dowladda, uuna baadho cid kasta oo maamusha hantida qaranka; sida hay'adaha dawladda, dawladaha hoose, hay'adaha madaxa-bannaan, shirkadaha dowladdu leedahay, iyo hay'adaha maamula deeqaha shisheeye, si loo hubiyo inay u hoggaansan yihiin Sharciyada Maamulka Maaliyadda (PFM laws).

### La-xisaabtanka Baarlamaanka ee Xukuumadda

Waxaan masuul ka nahay u gudbinta Golaha Wakiillada ee 'Warbixinta Sannadlaha ee Xisaabaadka Qaranka', taasi oo awood u siinaysa Baarlamaanka inuu la xisaabtamo Waaxda Fulinta (Xukuumadda) habka ay u maamuleen hantida dadweynaha.

### Dhaqangalka Sharciga & La-dagaallanka Musuqmaasuqa

Qodobka 110 wuxuu Xafiiska awood u siinayaa inuu la dagaallamo musuqmaasuqa heer kasta. Hantidhawraha Guud wuxuu awood dastuuri ah u leeyahay inuu go'aamiyo isticmaalka khaldan ee hantida, inuu soo rogo ganaax caddaalad ah, iyo inuu kiisaska dembiyada toos ugu gudbiyo Xeer-Ilaalinta Guud si loo maxkamadeeyo.

## Qiimayaashayada Aasaasiga ah



**HUFNAAN:**
Waxaan ku shaqaynaa run, dhiirnanaan, iyo anshax sare go'aan kasta oo aan qaadanayno



**MADAX-BANNAANI:**
Waxaan u shaqaynaa si madax-bannaan oo ka madhan cabsi iyo eex (Without fear or favor) si aan ugu adeegno danta guud



**XIRFAD-YAHANNIMO:**
Waxaan u hoggaansanahay heerarka caalamiga ah ee (ISSAIs) si aan u dhowrno tayada shaqada.



**DAAHFURNAAN:**
Waxaan nahay tusaale nool, waxaanan hubinaynaa in shaqadeenu tahay mid ay si furan u wada heli karaan dadweynuhu.



**HAL-ABUUR:**
Waxaan adeegsannaa tiknoolajiyad iyo habab casri ah si aan u samayno saamayn muuqata oo dhab ah (Greater impact).



# Dulmar Kooban & Fariinta Hantidhawraha Guud

Sannadkii 2025-ka wuxuu Xafiiska Hantidhawraha Guud (XHG) u ahaa sanadkii 'Isbeddelka Istaraatiijiga ee Dhabta ah. Waxaan qaadanay go'aan ku dhisan baraarug; inaan ka guurno hannaankii caadiga ahaa ee hubinta maaliyadda iyo shuruucda (Routine Financial & Compliance), una wareegno nidaam casri ah oo ku qotoma Natiijo iyo Waxqabad, kaas oo mudnaanta siinaya mabda'a caalamiga ah ee 'Waxtarka Maaliyadda' (Value for Money).

Sannadkan, waxaan xoogga saarnay 'is-qiimayn gudeed' iyo ku-dhaqanka heerarka caalamiga ah. Annagoo adeegsanayna hannaanka (SAI PMF), waxaan baadhis qoto dheer ku samaynay sida nidaamkeenu u waafaqsan yahay halbeegyada caalamiga ah ee INTOSAI. Si aan taas u kabno, annagoo kaashanayna shirkadda 'Grant Thornton', waxaan samaynay daraasad ballaadhan oo ku saabsan baahiyaha kaabayaasha xafiiska. Yoolkan labada waji leh (Dual-lens) wuxuu xaqiijinayaa inaan noqono hay'ad aqoon ahaan dhisan, qaab-dhismeed ahaan-na u qalabaysan gudashada waajibaadkeeda.

Qodobka ugu muhiimsan, waxaan hirgelinay dhaqan-hoggaamineed oo ah 'Hoggaanku waa Tusaale' (Tone at the Top), annagoo maalgashi baaxad leh ku samaynay dhismaha shaqaalaha. Waxaan fulinay qorshe-xirfadeed dardar leh, halkaas oo madaxda sare ay hormuud ka noqdeen heerka sareynta, iyagoo qaatay shahaadooyin gaar ah sida (CFE), taasi oo dhiirrigelisay in shaqaaluhu u tartamaan shahaadooyinka caalamiga ah sida ACCA, CFE, CIA iyo IDI PESA.

Tayadaas aan dhisnay waxay sahashay inaan daboolno 83% Qorshaha Baarista ee sannadkan. Waxaan hawlgalinay Waaxdii ugu horraysay abid ee Baarista Waxqabadka (Performance Audit Unit - PAU), waxaanan bilownay nidaamka 'Baadhitaannada Gaarka ah ee Degdegga ah' (Agile Special Audits) si looga jawaabo arrimaha muhiimka u ah bulshada.

> ***"Waxaan dhisaynaa hay'ad aanay shaqadeedu ku ekayn warbixin la qoray, balse ay natiijooyinka baadhitaannadeenu isku beddelaan horumar dhab ah oo ay noloshooda ka dareemaan muwaadiniinta reer Puntland."***

**Mudane Cismaan Maxamuud Cali, FCCA, CIPFA, CFE**
*Hantidhawraha Guud, Dawladda Puntland*

# DULMARKA WAXQABADKA 2025



## WAXAAN BAARNAY

*Waxaa fuliyay koox ka kooban* **110** *khubaro iyo xirfadlayaal hantidhawr ah*

### XISAAB-XIRKII GUUD EE DOWLADDA EE 2024

**1** Warbixin-Xisaabeed oo la Xaqiijiyay

**100%** Fulinta Qorshihii Baarista

**$154.9 M** Miisaaniyada Qoondeysan ee la Baaray

### HAY'ADAHA DAWLADDA (HEER DHEXE)

**11** Wasaaradood oo ah kuwa Adeegga Muhiimka ah

**65%** Fulinta Qorshihii Baarista

**$43.6 M** Miisaaniyada Qoondeysan ee la Baaray

### DAWLADAHA HOOSE (DEGMOOYINKA)

**10** Degmo oo la baaray

**83%** Fulinta Qorshihii Baarista

**$10.5 M** Miisaaniyada Qoondeysan ee la Baaray

### HAY'ADAHA MADAXA-BANNAAN

**8** Hay'adood oo la baaray

**100%** Fulinta Qorshihii Baarista

**$9.0 M** Miisaaniyada Qoondeysan ee la Baaray

## Waxaan Qabanay

### Halbeegaynta Caalamiga ah

**100%**

Dhammaystirka Is-qiimaynta (SAI PMF) iyo Dib-u-eegis Hay'adeed oo Madax-bannaan

### Hal-Abuurka Hantidhawrka

**1ST**

Yagleelidda Waaxdii ugu horraysay ee Baarista Waxqabadka (PAU).

### Kormeer ku Salaysan Baahida Taagan

**6**

Baaritaano gaar ah oo muhiim ah, lana gudbiyay

## Tayaynta & Maalgashiga Dadka

### Hoggaan Tusaale ah/Ku-dayasho Mudan

**1** Hantidhawraha Guud oo qaatay Shahaadada Baaritaanka xatooyada (Certified Fraud Examiner - CFE)

### (Halbeeg Caalami ah

**6** Shaqaale oo bilaabay Shahaadada IDI PESA (Maaliyadda, U-hoggaansanaanta & Waxqabadka)

### Xaqiijinta Xirfadaha Gaarka ah

**8** Shaqaale oo ku takhasusaya Hantidhawrka Xatooyada (5 CFE) & Hantidhawrka Gudaha (3 Internal Audit - CIA)

### Hoggaanka Mustaqbalka

**5** Shaqaale oo ku guuleystay Deeq Waxbarasho 'Master's Degree' oo Caalami ah

### Aas-aaska Farsamada/Aqoonta

**22** Shaqaale oo si buuxda looga bixiyay Shahaadooyinka Xisaabaadka ee ACCA iyo CAT.

# NAQSHADDA ISBEDDELKA IYO QAAB-DHISMEEDKA ISTARAATIIJIYADDA

Sannadkii 2025, Xafiiska Hantidhawraha Guud (XHG) wuxuu qaatay dariiq cilmiyeysan oo adag (Scientifically rigorous) oo lagu hirgelinayo dibu-habaynta Xafiiska. Waxaan iswaafajinay Is-qiimayn Gudaha ah iyo Qiimayn Dibadeed, si aan u samayno khariidad hufan (Flawless Roadmap) oo aan ku wajahno mustaqbalka.



## IS-QIIMAYNTA HALBEEGA CAALAMIGA AH (SAI PMF)

(Jidka loo maro Qaan-gaarnimada Xirfadeed)

Iyadoo la raacayo qaab-dhismeedka INTOSAI, ayaa guddi-farsamo oo gudaha ahi waxay isticmaaleen shuruucda caalamiga ah ee cabbirka tayada iyo waxqabadka ee (SAI PMF), si loo miisaamo nidaamyadeenna

**Qiimayn Dhinac-walba ah (Hab-raacyada)**

*Qiimaynta guud ahaan mashiinka shaqada (operational machinery) iyadoo la barbardhigayo kuwa caalamka ugu fiican.*

**Waafaqsanaanta Halbeegyada INTOSAI (Heerarka)**

*Xaqiijinta inaan u hoggaansanahay Qaab-dhismeedka Xirfadlayaasha Caalamiga ah (IFPP)*

**Madax-bannaanida & Anshaxa (Tiirarka)**

*Adkaynta sharciyadda iyo mabaadi'da anshaxa si loo helo kormeer dhexdhexaad ah (Unbiased).*

**Seeska Istaraatiijiyadda (Xog-ogaalnimo)**

*Isticmaalka xogta dhabta ah si loo buuxiyo goldalooloolyinka, loona sawiro mustaqbalka.*

SUPPORTED BY EU

## DIB-U-EEGISTA QAAB-DHISMEEDKA (HAY'AD DIBADEED)

(Naqshadda Kaabayaasha Dhismaha & Koboca)



Annaga oo kaashanayna khubaro madax-bannaan (Grant Thornton) si ay u qiimeeyaan baahiyaha dhabta ah ee jireed (Physical) iyo kuwa maaliyadeed ee xafiiska. Warbixintani waxay na siisay qorshe maalgashi oo qiimaysan (Fully costed Investment Blueprint)

**Horumarinta Kaabayaasha Dhismaha**

*Dhismaha xarun-dhexe (Headquarters) casri ah oo leh kaydka xogta, kuna habboon Hay'ad Sare(SAI)*

**U-guurista Nidaamka Dijitaalka ah**

*Soo iibsiga Nidaamka Maamulka Baarista (AMS) iyo qalab casri ah si looga guuro isticmaalka waraaqaha (Paperless).*

**Awoodda Dhaqdhaqaaqa Hawlaha**

*Tayaynta gaadiidka si baaritaanku u gaaro degmooyinka fogfog iyo dowladaha hoose.*

**Istaraatiijiyadda Raadinta Kheyraadka/Dhaqaalaha**


*Nidaam la hubiyay oo lagu sugayo dhaqaalaha si loo xaqiijiyo koboc waara.*

FUNDED BY THE WORLD BANK


**ISKU-DHAFKA NATIIJOOYINKA IYO U-BEDDELKOODA WAXQABAD**

# QORSHAHA ISTARAATIIJYADEED (2026–2030)

Annagoo is-waafajinayna xogta tayada ee SAI PMF (Qualitative) iyo baahiyaha maalgashi ee tirooyinka ku dhisan Grant Thornton (Quantitative), waxaan diyaarinay Qorshe Istaraatiijiyadeed oo ku dhisan xog-dhab ah (Data-driven). Qorshahan waa mid Macquul ah (Realistic), la Maalgelin karo (Fundable), Saamaynna leh (Impactful).




**Qabyo-qoraalka Qorshaha oo La Dhammaystiray**




**Falanqaynta Goldaloolooyinka oo La Xaqiijiyay**

# FULINTA BAARISTA– QAYBTA 1AAD

## WARBIXINTA XISAAB-XIRKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND EE 2024




SAWIR (SCAN) HALKAN SI AAD U AKHRISO WARBIXINTA BAARISTA MAALIYADEED OO DHAMMAYSTIRAN.

## DULMARKA NATIIJOOYINKA BAARISTA

### 1. KALSOONIDA MIISAANIYADDA & HANNAANKA MAAMULKEEDA

**⚠ CILLADDA**

Waxaa jira farqi weyn (Significant Deviation) oo u dhexeeya miisaaniyaddii la ansixiyay iyo fulinta dhabta ah. Waxaan aragnay qoondo-beddelasho aan la ansixin (Unapproved reallocation), kharashaad aan waafaqsanayn qorshaha loo qoray, iyo qiyaasta miisaaniyadda oo aan ku salaysnayn xog hore ama baahiyo dhab ah.

**💡 TALO-SOO-JEEDIN ISTARAATIIJIYADEED**

Dhaqangalin adag oo lagu sameeyo Xeer-nidaamiyaha Maamulka Maaliyadda (Qodobka 22). Waa in kharashaadku si buuxda u waafaqsanaadaan khadka miisaaniyadda la ansixiyay. Wasaaradda Maaliyadu waa inay xannibto isku-wareejinta lacagaha aan marin nidaamka, lana xaqiijiyo ansaxnimada dukumentiyada ka hor intaan lacagta la fasixin.

### 2. XAQIIJINTA DAKHLIGA & MAAREYNTA LACAGTA CAD

**⚠ CILLADDA**

Khatar sare oo ah dhiig-bax dakhli oo ka dhalanaysa nidaamka rasiidhada gacan-ku-qoriska ah (sida rasiidho la tirtiro) iyo dib-u-dhac ku yimaada xaraynta lacagaha bangiga (>24 saac). Sidoo kale, nidaamka maaliyadda ee PFMIS-ka waxaa ka muuqda tirooyin dakhli oo aan la garanayn meesha ay raacsan yihiin (Unassigned figures), kuwaas oo aan la jaan-qaadayn xisaabta Bangiga.

**💡 TALO-SOO-JEEDIN ISTARAATIIJIYADEED**

In si buuxda loogu guuro Nidaamka Rasiidhada Dhijitaalka ah (100% Digital Receipting), lana joojiyo isticmaalka lacagta caddaanka ah ee gacanta lagu qabto (Cash handling). In la hirgeliyo nidaam qasab ah oo bille ah oo lagu waafajinayo (Reconciliation) xogta PFMIS-ka iyo Xisaabaadka Bangiga si loo xalliyo farqiga u dhexeeya.

### 3. HUFNAANTA KHARASHKA & U-HOGGAANSANAANTA IIBKA

**⚠ CILLADDA**

Kharashaad la bixiyay iyada oo aanay dhammaystirnayn dukumentiyada caddaynta ah (Supporting docs). Isticmaalka nidaamka 'Qandaraas cid gaar ah lagu xiro' (Single-Source) oo laga door bidayo tartan furan marka la dhisayo mashaariic waaweyn, iyo Canshuurta Dakhliga (Withholding Tax) oo aan badanaa laga jarin lacag-bixinta.

**💡 TALO-SOO-JEEDIN ISTARAATIIJIYADEED**

In la hirgeliyo siyaasad adag oo kontarool oo ah: '**Caddayn la'aan, Lacag bixin la'aan' (No Support, No Payment)**. Dhammaan heshiisyada dowladda, gaar ahaan kaabayaasha dhaqaalaha, waa inay maraan tartan furan. Jarista canshuurtana waa in laga dhigo 'Otomaatig' oo ay mishiinku gooyo xilliga lacag bixinta.

### 4. HANTIDA IYO DEYMAHA DAWLADDA

**⚠ CILLADDA**

Xisaab-xirka Dawladdu waa qabyo sababtoo ah waxaa maqan 'Diiwaanka Guud ee Hantida Ma-guurtada ah' (Fixed Asset Register), iyo diiwaangelinta deymaha oo aan dhammaystirnayn (deymaha hadda la hayo waxay u badan yihiin haraaga dhismooyinka).

**💡 TALO-SOO-JEEDIN ISTARAATIIJIYADEED**

In la sameeyo qiimayn iyo xaqiijin guud oo heer dawladeed ah (Asset Verification & Valuation) si loo buuxiyo Diiwaanka Hantida, iyadoo la raacayo Qodobka 40aad ee Xeerka Maaliyadda. Isla markaasna, in la sameeyo 'Xarun Dhexe oo Diiwaangelisa Deymaha' si loo ogaado culayska deyn ee saaran Dowladda.

**! KHATARTA UGU WEYN:** **Ku-tiirsanaanta joogtada ah ee nidaamka gacan-ku-qoriska ah (Manual processes), waxay wiiqaysaa sugnaanta iyo sharafka Nidaamka Maamulka Maaliyadda Dowladda (PFM)**

# FULINTA BAARISTA– QAYBTA 2AAD

## WARBIXINTA GUUD EE U-HOGGAANSANAANTA SHARCIGA EE 2024

# BAAXADDA BAARISTA & ISTARAATIIJIYADDA FULINTA




## Nidaamka, Farsamada Iyo Hannaanka Baarista

### HALBEEGYADA AAN KU SHAQAYNAY

HABRAACA BAARISTAYADU WUXUU SI ADAG U WAAFAQSANAA HEERARKA UGU WANAAGSAN EE CAALAMIGA AH:

- **ISSAI 100 (Mabaadi'da Aas-aasiga ah):** Xaqiijinta madax-bannaanida buuxda, anshaxa suuban, iyo ilaalinta tayada shaqada inta ay socoto.
- **ISSAI 400 & 4000 (Baarista U-hoggaansanaanta):** Qiimaynta sida loogu hoggaansamay Xeerka Nidaamka Maaliyadda (1961), Xeerka Iibka, iyo Shuruucda Shaqaalaha Rayidka ah.

### HABKA URURINTA CADDAYMAHA

KUMAANAAN KOOBNAAN AKHRINTA WARAAQAHA (DESK REVIEW) OO KALIYA; WAXAAN ISTICMAALNAY HAB FARSAMEED 'SADDEX-XAGAL AH' (THREE-PRONGED APPROACH) SI AAN U SUGNO CADDAYMAHA:

- **Hubinta Dukumentiyada:** Baaris qoto-dheer oo lagu sameeyay boonooyinka 2024, heshiisyada, iyo faylasha shaqaalaha.
- **Kormeerka Goobta:** Xaqiijin jireed oo lagu tagay goobaha si loo arko hantida taalla, dhismooyinka socda, iyo badeecadaha la sheegay in la iibiyay.
- **Xaqiijinta Cid Saddexaad:** Xaqiijin toos ah oo aan la sameynay shirkadaha wax iibiya (Vendors) iyo bangiyada, si aan u hubinno jiritaanka wax is-dhaafsan.

### XADKA/BAAXADDA BAARISAHA

- **Muddada:** 1da Janaayo – 31ka Diseembar 2024.
- **Hay'adaha:** 19 Hay'adood oo Muhiim ah (Amniga, Dhaqaalaha, Bulshada & Maamulka)
- **Ujeeddada:** Si loo xaqiijiyo in dhammaan hawlaha, dhaqdhaqaaqa maaliyadeed, iyo xogtu ay waafaqsan yihiin, dhinac kasta oo muhiim ah (Material respects), shuruucda maamusha hay'adahaas.

# DULMARKA NATIIJOOYINKA BAARISTA

## 1. GOLDALOOLOOYINKA XAQIIJINTA DAKHIGA (Dakhliga & Canshuuraha)

### Cilladda:

Waxaan ogaannay dhiig-bax dakhli oo baahsan, oo ay ku jirto Canshuuraha Macaash-ka oo aan la ururin, lacagaha ruqsadaha ganacsiga oo maqan, iyo hay'ado aruuriya Dakhli Hoosaad oo aan haysan sharciyad.

### Khatarta:

Dabar-goynta seeska maaliyadeed ee dowladda, lumitaanka hantida dadweynaha oo ay sababto lacagta gacanta lagu qabto, iyo warbixin-xisaabeedka oo aan dhammaystirnayn.

### Talo-soo-jeedin Istaraatiijiyadeed:

Dhaqangelinta Siyaasadda 'Mudnaanta Koowaad waa Dijitaalka' (Digital-First). In dhammaan dakhliga lagu xareeyo nidaamka PFMIS-ka, gabi ahaanbana la mamnuuco lacag qabashada gacanta, iyadoo la amrayo in bankiga/moobilka lagu shubo 24 saac gudahood.

## 2. U-HOGGAANSANAANTA IIBKA IYO KHARASHKA

### Cilladda:


Adeegsi baahsan oo ah 'Qandaraas cid-gaar ah lagu xiro' (Single-Source) oo loo maray dhismayaasha iyo iibka alaabta, iyadoo la garab-marayo sharciga tartanka furan. Lacag-bixino badan ayaa lahaa dukumentiyo qabyo ah (Sida Qaansheegta /Invoices iyo Caddaynta alaab-wareejinta/Delivery Notes).

### Khatarta:

Hoos u dhaca 'Waxtarka Maaliyadda' (Value for money), daahfurnaan la'aan ku timaada bixinta qandaraasyada, iyo suuragalnimada in la lunsado hantida.

### Talo-soo-jeedin Istaraatiijiyadeed:

In gabi ahaanba la joojiyo hab-dhaqanka maamul-xumada iibka (Ad-hoc practices). Dhammaan qandaraasyada ka badan $5,000 waa inay maraan Tartan Furan oo waafaqsan Sharciga Iibka Dowladda. Khasnadduna waa inay hirgeliso kantaroolka ah 'Caddayn la'aan, lacag lama bixin karo'.




SAWIRO (SCAN) HALKAN SI AAD U AKHRISO WARBIXINADA HANTIDHAWRKA U-HOGGAANSANAANTA OO DHAMMAYSTIRAN.

## 3. MAAREYNTA KHEYRAADKA (Hantida & Shaqaalaha)

### Cilladda:

Dowladda oo aan lahayn 'Diiwaanka Dhexe ee Hantida Ma-guurtada ah', taas oo keentay in gaadiid maqan yahay (21 gaari ayaa la xaqiijiyay inay maqan yihiin). Baadhis lagu sameeyay shaqaalaha (HR) ayaa muujisay shaqaalaysiin aan marin Hay'adda Shaqaalaha Rayidka ah iyo galalka/faylasha shaqaalaha oo maqan.

### Khatarta:

Xatooyo hantiyeed, awood la'aanta raadraaca hantida dowladda, iyo mushahar-bixino aan la xaqiijin (Shaqaale Been-abuur ah / Ghost Workers).

### Talo-soo-jeedin Istaraatiijiyadeed:

In degdeg loo sameeyo hawlgal heer Qaran ah oo lagu diiwaangelinayo lana sumadaynayo Hantida Dowladda. In la mideeyo kantaroolka shaqaalaysiinta iyo mushaharka oo la hoos geeyo Hay'adda Shaqaalaha Rayidka ah si loo xaqiijiyo nidaam ku dhisan karti iyo cadaalad.

## 4. KANTAROOLKA GUDAHA

### Cilladda:

Maqnaanshaha ama daciifnimo ka jirta waaxaha Hantidhawrka Gudaha ee wasaaradaha. meelaha ay ka jiraanna, ma haystaan madax-bannaanidii iyo awooddii ay ku siin lahaayeen maamulka xaqiijin rasmi ah.


### Khatarta:

Fashil maamul oo ku yimaada heerka fulinta (Operational Level); qaladaadka iyo musuqmaasuqa oo aan la ogaan illaa uu yimaado Hantidhawrka Guud.

### Talo-soo-jeedin Istaraatiijiyadeed:

In la xoojiyo Hantidhawrka Gudaha iyadoo la soo saarayo 'Axdiga Cusub ee Hantidhawrka Gudaha' oo dammaanad qaadaya madax-bannaanidooda. In shahaadooyin xirfadeed (sida CIA/CFE) laga dhigo shardi, si loo xoojiyo 'Difaaca Koowaad' (First Line of Defense) ee hay'adda.

## QAAB-DHISMEEDKA MAAMUL-WANAAGGA



# FULINTA BAARISTA– QAYBTA 3AAD

## BAARISTA DAWLADAHA HOOSE EE SANNAD-MAALIYADEEDKA 2024

## Daadajinta Baarisaha: Gaarsiinta Isla-xisaabtanka Ilaa Heer Deegaan.

**83% HEERKA FULINTA**

Waxaan baarnay 10 ka mid ah 12-kii Degmo ee qorshuhu ahaa sanadkan 2025.

Dawladaha Hoose waa 'Safka Hore' ee bixinta adeegyada bulshada. Sannadkii 2025-ka, Xafiiska Hantidhawraha Guud wuxuu mudnaan gaar ah siiyay in 'Isha Ilaalinaysa' loo dhaweeyo muwaadinka. Iyadoo ay jireen caqabado xaga saadka iyo gaadiidka ah (Logistical challenges) ee deegaanada fog-fog, kooxaheenu waxay ku guuleysteen inay baaris dhammaystiran ku sameeyaan 10 Degmo, iyagoo diiradda saaraya: Ururinta Dakhliga, Maareynta Hantida, iyo Kharashaadka Adeeg-bixinta.


### Degmooyinka la Baaray Sannadkan 2025:

- Garoowe
- Boosaaso
- Gaalkacayo
- Badhan
- Qardho
- Burtinle
- Dangorayo
- Goldogob
- Eyl
- Jarriiban

### Degmooyinka Qorshaysnaa (Ee weli dhiman):

- Bandarbayla
- Baargaal

## Khariidadda Fulinta Baarista



# BAARITAANNADA GAARKA AH – KA-JAWAABIDDA DEGDEGGA AH EE DANTA GUUD

Baaris Xaqiijin ah oo degdeg ah (Urgent Verification), kaas oo lagu dhowrayo sugnaanta Istaatistikada/Xogta Qaranka iyo in la sugo sarraynta sharciga marka ay timaado heshiisyada la xiriira xogta.

Dib-u-eegis Talo-bixin ah (Advisory Review) oo lagu nidaaminayo laguna casriyeynayo wadaaga dakhliga kalluumeysiga. Ujeedku waa in la fasaxo oo la kordhiyo dakhliga waara ee kasoo xarooda kheyraadka badda.

Baaris Xaqiijin ah oo Xasaasi ah, kaas oo abuuray gogol-xaar dhexdhexaad ah (Impartial basis) oo lagu xalliyo deymaha/haraaga dawladaha hoose, si loo soo celiyo xasiloonida maaliyadeed ee magaaladaasi.

Dib-u-eegis Waxqabad oo 'Toos ah' (Real-time performance review) oo lagu xaqiijinayo hufnaanta shaqada iyo isla-xisaabtanka Albaabka Ganacsiga ee ugu weyn Puntland (Dekedda & Kastamka).

Baaris Gaar ah (Ad-hoc Inquiry) oo si qoto dheer loogu eegay hab-raaca aqoonsiga iyo diiwaangelinta dakhliga kasoo xarooda kalluumeysiga.

Dib-u-eegis fal-celin leh (Responsive review) oo lagu dammaanad qaadayo daacadnimo (Probity) iyo fulin tayo leh oo lagu sameeyo mashaariicda horumarinta ee heer deegaan.

## Ballanqaadka Hantidhawraha Guud ee Shaqo Hufnaanta iyo Degdegga

> *"Baaritaannadayada gaarka ah waxay daah-furayaan bog cusub oo u bilowday taariikhda Hantidhawrka Puntland. Ma nihin hay'ad kaliya sugta qorshaha sanadlaha ah; waxaan hadda nahay 'Wehel Firfircoon' (Agile Partner) oo u taagan dowladda, diyaarna u ah inaan ka jawaabno khataraha degdegga ah, islamarkaana ku taageerno go'aamada dowladda xog dhab ah waqtiga ay taagan yihiin."*

# ISBEDDELKA ISTARAATIIJIYADEED: U-JEEDINTA DIIRADDA EE DHANKA 'WAXTARKA MAALIYADDA' (VFM)



## KA-GUURISTA 'TIRINTA LACAGTA', UNA GUURISTA 'QIIMAYNTA NATIIJOOYINKA': WAJI CUSUB OO AAN KU EEKEYN KALIYA XAQIIJINTA SHARCIGA.

Sannadkii 2025-ka wuxuu Xafiiska Hantidhawraha Guud (OAG) u asteeyay isbeddel taariikhi ah, kaas oo ah hawlgelinta rasmiga ah ee 'Waaxda Baarista Waxqabadka' (Performance Audit Unit - PAU). Waxaan ka tallaabsannay su'aashii dhaqanka ahayd ee Hantidhawrka ee oran jirtay: '*Lacagta ma loo bixiyay si sharci ah?*', annagoo u guurnay waydiin aad u gun-dheer oo ah: '***Kharashka la bixiyay, ma dhaliyay natiijadii loogu talo galay, muwaadiniintuna ma heleen waxtarkii (Value) ay xaqa u lahaayeen?***'

**DHAQAALAYNTA KHARASHKA**

Xaqiijinta in adeegga lagu helo kharashka ugu yar, iyada oo aan hoos loo dhigayn tayada shaqada.

**HUFNAANTA/ WAX-KU-OOLNIMADA**

In kheyraadka yar ee la isticmaalay laga soo saaro waxqabadka ugu badan

**DHAQANGALKA / GAARISTA YOOLKA**

Qiimaynta in mashruucu uu dhab ahaan u gaaray hadafkii laga lahaa, iyo inuu keenay natiijo waarta



Koox xirfad-layaal ah oo kala duwan, oo ay hoggaaminayso Agaasime **Fardowsa Saciid Faarax**, kuwaas oo dardar-galinaya ajandaha cusub ee Xafiiska ee ku qotoma hubinta waxqabadka dhabta ah iyo gaarsiinta adeeg loo-dhan-yahay.

# RUKUMAYNTA TAYADA & HEERKA-SARE:
## DHISIDDA QAAB-DHISMEEDKA BAARISTA WAXQABADKA

## Sees Ku Qotoma Halbeegyo & Qaab-dhismeed

**Diyaarinta iyo Ansixinta Siyaasadda & Axdiga Baarista Waxqabadka**

Tani waxay sees u noqotay qeexidda waajibaadka, hawlaha, iyo qaab-dhismeedka Waaxda BW

**Habaynta & La-jaan-qaadidda Buug-hagaha (AFROSAI-E Manual) iyo Waraaqaha Shaqada.**


Kooxdayadu waxay waafajiyeen halbeega caalamiga ah duruufaha dalka (Local Context), si loo hubiyo in nidaamku leeyahay tayo, isla markaana xiriir la leeyahay xaqiiqada jirta

**Daahfurka Baaritaanno Tijaabo Ahaa ee Ugu Horreeyay**

Waxaan bilownay inaan tijaabo ku samayno waaxaha adeegga muhiimka ah (Biyaha & Waxbarashada), si aan u dhisno khibrad la taaban karo, una soo saarno natiijooyin degdeg ah

# Hormuudka Isbeddelka:
## Kooxdayada Baarista Waxqabadka





*"Dhismaha Kooxdayadu wuxuu salka ku hayaa lahaanshaha xirfado kala duwan (Diverse Skills) iyo ballan-qaad midaysan oo ah abuurista saameyn ka jawaabaysa baahida muwaadinka (Citizen-centric impact). Waxaan ku hoggaaminnaa 'Xiiso Xirfadeed' (Professional Curiosity) iyo xamaasad aan u qabno inaan 'Cilladaha aan helno' (Findings) u beddelno 'Xal waara' (Solutions), Insha-Allah."*


*—Hoggaamiyaha Kooxda Baarista Waxqabadka*



# MAALGASHIGA HEERKA-SARE IYO TAYAYNTA SHAQAALAHAYAGA

**110** Khubaro iyo xirfad-layaal u heellan ilaalinta iyo badbaadinta Danta Guud

**24% Matalaadda Dumarka.**
*Arrintan ayaa ah dhiirrigelinta ka-qaybgalka loo-dhan-yahay (Inclusivity) iyo fursadaha shaqo ee loo siman yahay*





**QAYBINTA ISTARAATIIJIGA AH EE SHAQAALAHA**

Shaqaalaha Gaarka u ah Baarisaha

**61** (55%) oo shaqaalaha ka mid ah ayaa ah kuwo si khaas ah ugu magacaaban arrimaha baarisaha

## Joogitaankayaga Heer Qaran & Daadejinta Hawlaha Baarista




**Hoggaan Tusaale ah**

Hantidhawraha Guud ayaa qaatay Shahaadada Caalamiga ah ee Baaritaanka Musuqa (CFE), isagoo xoojinaya dhaqanka 'Waxbarashada Joogtada ah'.

**Halbeeg Caalami ah**

**6**

Shaqaale ayaa lagu daray barnaamijka heerka caalamiga ah ee IDI PESA

**Shahadoyinka Takhasuska**

**9**

Shaqaale ayaa diyaariya shahaadooyin gaar ah sida (CFE), (CIA) iyo (CPA)

**Hoggaanka Mustaqbalka**

**5**

Shaqaale ayaa loo diray Deeq Waxbarasho "Master's Degree" ah oo caalami ah

**Aas-aaska Farsamada**

**22**

Shaqaale ayaa laga bixiyay/kaafaala-qaaday shahaadooyinka xisaabaadka ee ACCA/CAT.

> *"Hantida ugu qaalisan ee aan leenahay waa dadkayaga. Maalgashiga aan maanta ku samaynayno hantidhawrayaasheena, waxaan ku sugaynaa in beri laga helo Puntland nidaam kormeer iyo isla-xisaabtan lagu kalsoonaan karo (Credible), islamarkaana saamayn dhab ah leh."*

# ISKAASHIGA DANEEYEYAASHA IYO WADATASHIGA BULSHADA

**250+**

Muwaadin & Arday ah oo ayaan la yeelanay wadatashi toos ah.

> *Ujeedkayagu ma ahan inaan kaliya wax dhaliilo, balse waa inaan si wadajir ah u yagleelno (Co-create) nidaam dowladnimo oo u adeega dadka.*
>
> - HG, Kulankii Dadweynaha ee (June 2025)




## XIRIIRKA & WACYIGELINTA DADWEYNAHA

Isla-xisaabtanku ma ahan warbixin la qoray oo kaliya, ee waa wada-hadal furan. Sannadkii 2025-ka, Hantidhawraha Guud wuxuu si firfircoon uga qayb-galay kulamo dadweyne, oo uu ku jiro 'Kulankii Fagaaraha' (Townhall) ee heerkiisu sarreeyay oo ay goobjoog ka ahaayeen madaxda dowladda ee Garowe. Ujeedkayagu wuxuu ahaa; inaan si toos ah u dhegaysanno dareenka muwaadiniinta iyo Ururada Bulshada Rayidka ah (CSOs), inaan u sharaxno doorkayaga kormeer, iyo inaan dhisno kalsoonida dadweynuhu ku qabaan nidaamka dowladnimada.






## Dhiirrigelinta Jiilka Berri

Iyadoo qayb ka ah ballan-qaadkayaga dhismaha aqoonta (Capacity building), Xafiisku wuxuu barnaamij 'Barbaarinta Xirfadda' (Mentorship Program) la bilaabay Jaamacadda Bariga Afrika (East Africa University), xarunteeda Garowe. Hantidhawraha Guud ayaa bixiyay duruusto heersare ah (Masterclasses) oo ku saabsan nidaamka casriga ah ee 'Xaqiijinta' (Assurance) iyo 'Hantidhawrka Dambi-baarista' (Forensic Auditing) si loo dhiirrigeliyo ardayda. Waxaan tallaabadan u aragnaa maalgashi mustaqbalka fog, si aan u soo saarno jiil xirfadlayaal ah oo dhowra anshaxa hantidhawrka.






# DHEERIGA WAAJIBAADKAYAGA SHAQO : IS-XILQAAN WADDANIYADEED

## MAS'UULIYADDA BULSHO IYO KAALINTA XAFIISKA

**$3,000**

Tabarruc mutadawacnimo ah oo ay iska ururiyeen shaqaalaha xafiiska, si loogu taageero Ciidamada Amniga Puntland.

Waxaan aaminsanahay in **'Sugidda Amniga Dalka'** iyo **'Ilaalinta Hantida Dalku'** ay yihiin laba waji oo aan kala harin (Two sides of the same coin), si loo helo dowladnimo adag.

Anagoo ah Tiirka Ilaalinta Hufnaanta Dowladda (Pillar of state integrity), waxaan garowsanahay in maamul-maaliyadeed oo hagaagsan iyo nidaam amni oo sugan ay mataano yihiin. Isla-xisaabtanka dhabta ahi kuma koobna xafiiska dhexdiisa, ee waxaa ka mid ah u-gar-garridda bulshada aan u adeegno. Sannadkii 2025, shaqaalaha Xafiiska Hantidhawraha Guud, waxay si sharaf leh u muujiyeen garab-istaag (Solidarity), iyagoo dhaqaale ku biiriyay 'Guddiga Taageerada Ciidamada'. Tani waxay sii xoojinaysaa doorkayaga ah inaan nahay 'Ilaaliyayaasha Hantida iyo Mustaqbalka Puntland'.

> ***"Ballan-qaadkayagu kuma koobna kaliya tirooyinka buugaagta ku qoran, balse wuxuu gaarayaa dadka ay tirooyinkaasi u adeegayaan."***

# CAQABADAHA JIRA IYO TUBTA HORUMARKA:
# HIIGSIGA 2026

## TUBTA HORUMARKA

Caqabaduhu waa kuwa dhaliya fursadda isbeddelka dhabta ah. Jidka aan higsanaynaa sanadaha soo socda waa mid cad: Inaan dhisno hay'ad aan ku koobnayn kaliya madax-bannaanida sharciga (Independent on paper), balse leh agabkii iyo aqoontii farsamo ee ay ku bixin lahayd adeeg hantidhawr oo la jaan-qaadaya heerarka caalamiga ah (World-class).

Xaqiijinta in 50% shaqaalaha Hantidhawrku ay qaataan Shahaadooyinka Xirfadda ee Caalamiga ah.

In 100% shaqada hantidhawrka loo guuro Nidaamka Casriga ah ee Maamulka Hantidhawrka (AMS).

Dhagax-dhigga Xarunta Dhexe ee rasmiga ah ee Xafiiska Hantidhawrka Guud.

Ansixinta iyo Dhaqangalka 'Xeerka Hantidhawrka' oo dhammaystiran.

## CAQABADAHA INA HORYAAL

**Caqabadda Maaliyadda**
Xaqiijinta madaxbannaani maaliyadeed oo buuxda si loo helo dhaqaale lagu dhiso hay'ad casri ah (SAI).

**Dib-u-habaynta Sharciga**
Dardar-galinta ansixinta 'Xeerka Hantidhawrka ee la diyaariyey' (Revised Audit Act) si loo sugo awoodda sharci ee hay'adda.

**Caqabadda Kaabayaasha**
Buuxinta baahiyaha dhismaha iyo saadka/gaadiidka (Logistics) si loo ballaariyo baaxadda juquraafiyeed ee hantidhawrka.

**Yaraanta Xirfad-layaasha**
Soo jiidashada iyo sii-haynta shaqaale leh xirfad sare, iyo kuwa haysta shahaadooyinka caalamiga ah.